

Febraayo 27, 2024

Arabia Mountain High Trio ayaa ku Guuleystay Tartanka App-ka iyo Naf badbaadinta ‘*Telepsy*’

Dhacdooyin dhiirogelin leh, sadex arday oo ka socda Dugsiga Sare Arabia Mountain waxay u bedeleen dhacdo naxdin leh oo fasalka ah guul tejnoolijiyad hor leh. Aubrey Allen, Ariel Hibbert, iyo Jasmine Stamper ayaa goob joog u ahaa macalinkooda ay jeclaayeen ayaa la dhibaatooday qalal, waqtiga ay si weyn u saameysay iyaga oo ay kicisay abuurista *Telepsy*, app casri ah oo loogu tallogalay in lagu maareeyo qalalka.

Mashruucooda, oo ka dhashay rabitaanka caawinta iyo hal abuurka, ayaa ku guuleystay Xildhibaan Henry C. “Hank” Johnson, Jr. ee Tartanka App-ka Xildhibaan 2023. *Telepsy* waxay ka dul taagantahay tartanka bandhiga dhameystiran, oo ay ku jiraan raadraaca qalalka, isku xirka adeegyada degdega ah, iyo nidaamka meeleynta isbitaalka iyo qariirada, taasoo ka dhigeysa aalad muhiim u ah shaqsiyaadka qaba qalalka.

Iyagoo ka duulaya rabitaanka lagu caawinayo la shaqeeyntooda dhaqaatiirta iyo xirfadlayaasha kale ee caafimaadka oo muddo hal sanno ka badan ah, ardayda waxaa ku dhaco *Telepsy* si ay u siiyan wax ka badan caawin caafimaad; waxay rabeen inay siiyan xasilooni maskaxeed oo run ah.

Ariel wuxuu xusuusanyahay waqtiga wax walba bedelay.

“Waxay aheyd waqtii naxdin iyo qiiro noo leh arday ahaan maadaama ay aheyd waqtiga ugu horeeyay oo aan ku aragnay macalinkeena xaaladaas,” ayay tiri.

Aubrey wuxuu aqbalay oo uu xasuustay inuu rabo inuu caawiyo dhacdada masiiriga kadib.

“Waaya aragnimadaan naxdinta leh waxay noo tahay sida dhiirogelin oo waxay nagu dhiirogelisay inaan abuurno app aan kaliya caawin karin macalinkeyga laakiin sidoo kale caawin kara dadka kale ee la tacaalaya qalalka,” waxaa yiri Aubrey.

Jasmine, dabagalka caafimaadka kadib markii qalalku uu bixiyay aragtii dheeraad ah oo ku saabsan naqshadeynta app-ka.

“Dhacdada kadib, waxaan ku aragnay inuu ka jawaabo su'aalo badan, taasna waxay u keentay aaladaha raadraaca in la tixgeliyo oo lagu daro app-keena.”

Tartanka waxaa lagu soo bandhigay kartiyada in ka badan 70 arday oo ka bilaabaneyso todobaa dugsi oo ka qeybqaatay ogolaanshaha ee tartanka iyadoo la sameyay 23 app-yo. Ugu dambeyntii, dhiirogelinta Aubrey, Ariel, iyo Jasmine, cilmi baarista iskaashiga, iyo naqshadeynta guusha ah ayaa kas baday kaalinta ugu sareysa.

Xildhibaan Johnson ayaa u hambalyeeyay ka qeybqaatayaasha oo ku ammaanay tartanka inuu yahay mid dhiirogelinaya maskaxyada dhalinyarada ee ku aadan shaqooyinka STEM (Sayniska, Tejnooliyada,

SOMALI

Injineernimada, iyo Xisaabaha), iyadoo xooga la saarayo muhiimada hindisayaasha noocan ah ee lagu kobcinayo xirfadaha hal abuurka iyo dhibaato xalinta.

“Tartanka App-ka ayaa wuxuu ujeedkiisa yahay kobcinta iyo ka qeybgelinta sayniska kumbuyutarka, oo waxaa sharaf ii ah inaan u dabaaldago dhammaan ardayda ka qeybqaatay sannadkaan, gaar ahaan marka la eego kobaca la taaban karo ee la saadaaliyay ee STEM (Sayniska, Tejnoolijiyada, Injineernimada, iyo Xisaabaha), xirfadaha,” waxaa yiri Xildhibaan Johnson.

Telepsy ayaa laga heli karaa Google Play. Safarkaan wuxuu matalaa xilli guul u ah Trio iyo, waxaa ka sii muhiimsan, tallaabo macno leh oo hore oo daryeelka iyo maareynta qalalka.

Sheekadaan guusha waa xasusin xoog leh oo ku saabsan sida xilliyada adag ee ku baaqida waxqabad waxay hormarin kartaa nolosha.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan *Telepsy*, ka maqal ardayda laftooda:

https://www.youtube.com/watch?v=p6_rvNce3c